

## Xilli-dugsiyeedkii deyrta ayaa ka bilaaban doona dhammaanba dugisyada hoose-dhexe ee magaalada Vantaa, iyadoo goobaha waxbarashada la tagi doono

Hay'adda caafimaadka iyo nolol-wanaagga, wasaaradda waxbarashada iyo guddoonka waxbarashaduba waxaa ay hagiis dhammaystiran ka soo diyaariyeen arrimaha la xiriira dib ugu soo laabashada waxbarashada iskuulka, kuwaasoo la doonaayo in iskuullada Vantaa laga dhaqangeliyo.

Waxaan si firfircooni leh ula soconeynaa hagista qaran ahaaneed ee mar walba soo baxaysa.

### Sidan soo socta ayaan ku sugi karnaa ammaanka waxbarashada iskuullada

- **Ardaygu iskuulka ma imaan karo, haddii uu isku arko xitaa wax yar oo astaamaha neefsashada la xiriira, qandho ama xummad, amaba uu dareemaayo in ay xanuunno kale hayaan.**
- Iskuulka dhexdiisa waa in lagu dadaalaa nadaafadda caafimaadka ee gacmaha iyo habka caafimaad ahaan loo qufaco.
- Howlaha iskuulka dhexdiisa ka dhici doona waxaa lagu xadeyn doonaa qaab waaxo yaryar ah, iyadoo tixgelinta la siin doono goobaha iskuulka dhexdiisa ee lagu xalliyay arrinkaas. Socodka ardeyda ee iskuulka dhexdiisa waxaa lagu hagi doonaa in ay ka baxaan albaabo kala duwan. Waxaan ku dadaali doonaa in waaxna aanay waaxda kale dhexgalin, laakiin waaxaha dhexdooda waxaa ay yeelan karaan wadashaqeyn iyagoo si ku filan u kala fogaanaayaa oo masaafo ay u dhexeyneyso.
- Howlmaalmeedka iskuulka dhexdiisa ka socda waxaa loo sameyn doonaa jadwal, si looga hortago in hal meel ay dad tiro badan isugu yimaadaan xilliga bareegga ama nasashada iyo xilliyada iskuulka la soo galayo ama laga baxayo.
  - Fasallada 1.–6. waxaa ay wax qaban karaan inta u dhexeysa saacadaha 8 iyo 16.
  - Fasallada 7. –9 waxaa ay wax qaban karaan inta u dhexeysa saacadaha 8 iyo 17.
- Arrimaha la xiriira goobaha cuntada lagu cunaayo iyo xilliyada la cunteynaayaba, waxaa lagu dadaali doonaa in laga dhigo mid waasic ah, islamarkaana la sugo dhanka nadaafadda caafimaadka ee la xiriirta cunto cunista.
- Munaasabado dad tiro badan isugu imaanayaan oo toos ah lama qabanqaabin doono, laakiin munaasabad fasalkaaga/ kooxdaada/ama unuggaaga waa la qabanqaabin karaa
- Dadka kale oo aan ka mid aheyn ardeyda iyo shaqaalaha iskuulka, looma oggola in ay yimaadaan oo joogaan agagaarka iskuulka xilliyada waxbarasho maalmeedku ka socoto iskuulka.
- Nidaamyada fasaxa xanuunka ee caadiga ah (sairauslomakäytänteet) wali sidodii ayay u shaqeynayaan. Dadka ka tirsan kooxda u nugul halista cudurrada (riskiryhmä), waxaa laga codsanayaa in ay la soo xiriiraan maamulaha iskuulka.
- Dadka ka soo noqonaaya fasaxa ay ku tageen wadamada ka baxsan xuduudaha dalkan Finland, waa in ay u hoggaansamaan talosoojeedinta xadeynta safarka ee ay dowladdu ka soo jeedisay mid kasta oo ka mid ah wadamadaas.
- Waxaa aad u wanaagsan oo la soo jeedinayaa, in qofku uu galo karantiin u gaar ah oo 14 maalmood ah, kaddib marka uu ka soo laabto waddamada hoosimaanaaya xadeynta safarka ee la sameeyay.

Waxaan idiin rajayneynaa waxbarasho wanaagsan oo ammaan leh !